# Golaha Wakiilada JSl

## Waaxda Hadal Qoraalka

## *Minuteska*

**Dooda Ajendaha Kal-fadhiga 18aad ee Golaha Wakiilada**

Kal-fadhigii 18aad fadhigiisii 2aad 10/06/2012

***Doodan waxaa ka qayb qaatay 12 Mudane waxayna Socotay Maalmi kaliye, Axad 10/06/2012***

Ajendaha Fadhiga:- Dooda AJendaha K/fadhia 18aad Wakhtiga furitaanka:- 9:30Am

**Gudoomiye:- Md.** Baashe Maxamed Faarax

1. **Md. C/raxman Maxamed Jaamac:-**Marka hore waad salaamantihiin, Ajenduhu wuu fiican yahay waxaan ugu horeyn soo jeedinayaa
   - in Qodobka 8aad ee Xeer Hoosaadka Golaha hore loo soo mariyo,
   - Xeerka Nabadgalyada Wadooyinkana lagu xijeyo maadaama uu yahay Xeer aad Muhiima u ah baahi badan loo qabo,
   - Xeerka fayadhowrka isna waa loo bahan yahay
   - Xeerka Baananka islaamiga ah amaan buu mudan yahay,

   waxaan dib u dhigi lahaa Xeerka statisticiska

   **Sidaa darted waxaan soo jeedinayaa:-** Ajedahan oo aad u fiican marka sidaa loo soo kala horumariyo in la ansixiyo.

2. **Md. C/raxman Cisman Caalin:-**waxaan soo jeedinayaa in Qodobka 3aad Masuuliyiinta loo yeedhayo in lagu daro Wasiirka Cadaalada, waxaan soo jeedinayaa xaalado dibada ah ayaa jira markaa waa in dood laga furaa.

3. **Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-** anigu waxaan ajendaha u soo kala soo horeysiinayaa sidan:-
   - Xisaab xidhka ha la keeno ayaan ugu horeysiinayaa
   - Xeerka Nabadgalyada wadooyinka
   - Xeerka aasaaska Musuqmaasuqa iyo Maamul wanaaga
     Waxaan odhan lahaa Xeer Hoosaadka hala saaroba.

4. **Md. Baar Siciid Faarax:-**
    - Xeerka Nabadgalyada Wadooyinka oo aad u mihiima dhibaato badan ka timaado oo dadkii ku madheen,
    - Xisaab xidhka dawladana waxaan qabaa inuu aad muhiim u yahay isna waa in la soo dedejiyaa, Xeer hoosaadka Golaha waxaan soo jeedin lahaa in isna la soo dedejiyo.
    - Xeer Hosaadka aynu soo horumarino waliba aynu u cadeyno inaan shirgudoonka la taabanayn oo aan iyaga loo socon ee Xeerka uun la hagaajinayo, waayo xeerar badan oo loo baahanyahay in Goluhu sameeyo ayaa ku xidhan, .
    - Tan Musuuliyiinta Qaran ee loo yeedhayo waxaan soo jeedinayaa in Wasiirka Gaashaandhiga iyo Wasiirka Arrimaha Dibada loo yeedho,

5. **Md. Ibrahim Axmed Haybe:-** anigu waxaan odhan lahaa oo soo jeedinayaa:-
    - Waxa ugu horeeya laga dhigo Qiimeynta Golaheena oo aynu ugu horeysiino
    - Xeer Hoosaadka Golaha Wakiilada
    - Xeerka Nabadgalyada Wadooyinka
    - Xeerka Aaasaaska Komishanka ladgaalanka Musuqmaasuqa iyo Maamul wanaaga Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka
    - Xeerka Baananka Islaamiga ah
    - Xisaab xidhada
    - Xeerka Faya dhowrka Hilibka

6. **Md. Saleeban Cawad Cali:-** waxaan anigu taageersanahay in Ajendaha lagu soo daro oo loogu horeysiiyo,
    - Qiimeynta Xaalada Golaha Wakiilada oo wixii intii Golahan jirey u qabsoomey iyo sidaynu u shaqaynayno ha loogu soo horeysiiyo
    - Qiimeynta Xaalada Guud ee dalka sida Arrimaha Dibada, Dhaqaalaha, Siyaasada iyo Amniga
    - Xeerka Nabadgalyada Wadooyinka
    - Xeerka Fayadhowrka Hilibka
    - Xisaab xidhada

7. **Md. Maxamed Saalaz Cige:-**anigu waxaan ajendaha odhan lahaa in laga dhigo sidan:-
    - Qiimeynta Xaalada Guud ee dalka
    - Waxaan kaloo odhan lahaa xeerar badan oo ajendihii hore ku jirey kana ka maqan sida Xeerka Ciqaabta Guud ha lagu soo daro
    - Xeerka Ciqaabta Ciidamada oo dastuurka ka horeeyay iminkana aan la jaanqaadi karayn isna halagu soo daro
    - In dib u eegis lagu sameeyo Go’aankii wax kabadalka ka qaybgalida shirarka caalamiga ah.

8. **Md. Xuseen Ismaciil:-** marka hore waxaan soo jeedinayaa oo aan taageersanahay in lagu soo daro

- Qiimeynta Golaha Wakiilada oo aan hagaajino Xeer Hoosaadka Golaha Wakiilada
- Qiimeynta Xaalada Guud ee dalka

9. **Md. Siciid Maxamed Cilmi:-** hadaad eegto calenderka 20 July waxay ku began tahay Ramadaan oo waa fasax Goluhu, maantana bishu waa 10kii june, mudadaa waxaan calculategareeyay intaynu ka faadhisanayno 3 cisho ee Goluhu wiigii fadhiisto, waxay noqotay 16 maalmood, markaa xeerka ugu yar ayay doodiisa iyo inta dib la isugu soo gurayaa qaadataa ugu yaraan 4 cisho, waxaa halkaa ka muuqata waxaynu qaban karno waa wax aad u yar.

**Sidaa darted waxaan soo jeedinayaa in:-**

- Xeerka Fayadhowrka Hilibka oo diyaara loogu horeysiiyo
- Xeerka baananka islaamiga oo doodiisu horey u dhamaatey oo maalin uu qaadanaya
- Xeerka hawlaha baananka iyo
- Warbixinada shirgudoonka iyo Gudiyada.

10. **Md. Xaashi Xusen Caabi:-** marka hore waad salaaman tihiin, anigu waxaan qabaa in

- *Xeer Hoosaadka* hala soo dhigo,
- *Maciishada* oo aad cirka u maraysa oo dhibaato badan dadkii ka haysata iyana waa lagu soo daraa ajendaha iyo Xaalada Guud ee dalku marayo
- *Xeerarka Baananka islaamiga iyo Hawlaha baananka*
- Waxaan kaloo soo jeedinayaa Gudiyada way shaqayn waayeene Gudiyada halabadalo
- *Xeerka Nabadgalyada Wadooyisnka* isna aad buu muhiim u yahay iyo
- *Xeerka Aaasaaska Komishanka Maamul Wanaaga iyo Ladagaalanka Musuqmaasuqa*.

11. **Md. Cali Ibrahim Aareeye:-** horta dhamaantiin waad salaaman tihiin, anigu waxaan soo jeedinayaa"-

- In *Qiimeynta Xaalada Guud* ee Dalka lagu soo daro waan taageersanahay
- *Qiimeynta Ascaarta*, waayo dadkii dhibaato badan baahaysata oo wuu liitaa, wixii qiimohoodu kor u kacana dib hoos ugu dhacaan.
- *Xeerka nabadgalyada Wadooyinka*
- *Xeerka Asaaska komishanka La dagaalanka Musuqmaasuqa iyo Maamul* wanaaga anigu garan mayo si Musuqmaasuq loola dagaalamayee isna waan taageersanahay
- *Xeerka Baananka Islaamiga ah*

- Sidoo kale wax ka badalka Xeer hoosaadka waan taageersanahay waa in la keenaa.

12. **Md. Ibrahim Jaamac Rayte:-** marka hore waad salaamantihiin, anigu marka hore waxaan leeyahay waa in Goluhu ka hadlo xaalada dalka ee manta marayo taas waxaan ka sugaynaa xukuumada, AJendaha halagu soo daro Qiimeynta Wacdiga siyaasiga ah ee daku ku sugan yahay marka horena aan inagu is qiimeyno oo aan Goleheena qiimeyno iyo shaqadeen.s

**Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Agg. Waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada JSL** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
----------------------------------------------------------- | -----------------------------------------------------------------